Kulanka hoggaaminta oo doonaya in uu qaabeeyo siyaasadda waxbarashada gobolka ee ku aadan sinnaanta

Kulan Sanadeedkii 3-aad ee Waxbarida ee Ujeedada Hoggaanka ayaa la qaban doonaa Sabtida, Maarso 24, isaga oo bilaabmaya 9:00 subaxnimo ilaa 3:30 galabnimo kana dhacaya Xarunta Hagen ee Jaamacadda Concordia.

Dhacdada waxaa ka qayb qaadan doona macallimiinta, maamulayaasha, waalidiinta, ardayda iyo xubnaha ka tirsan bulshada kuwaasi oo ka wada hadli doona kana shaqeyn doontaa hirgelinta sharciyada cusub ee dhanka sinnaanta, qiimeynta iyo isku keenidda fikradaha cusub ee dhanka manhajka iyo hawlqabashada. Dhacdadu waxay bixin doontaa talooyin gaar ah oo loogu talagalay biilasha iyo ilaha si loo wargeliyo fadhiga 2019 ee Sharci dejinta Oregon.

Geneva Gay, oo Macallimad Jaamacadeed ka ah University of Washington, ayaa noqon doonta qofka muhiimka oo goobta ka hadlaysa. Gay waa qof si caalami ah loogu yaqaan deeqdeeda waxbarasho ee dhanka waxbarashada dhaqamada kala duwan leh, gaar ahaan qorshaheeda manhajka, horumarinta shaqaalaha, waxbarashada fasalka iyo is-dhexgalka dhaqanka, jinsiga, qowmiyadda, waxbirida iyo waxbarashada.

Kulanku wuxuu sidoo kale u noqon doonaa tallaabada ugu horeysa ee macallimiintu ku helayaan ruqsadda Hoggaamiyaha Macallinka ah iyada oo la adeegsanayo Guddiga Nidaamyada iyo Waxqabadka Macallinka ee Oregon. Ruqsadda waxaa “la siiyaa macallimiinta xirfada leh ee muujiya hoggaanka wanaagsan oo ka jira dugsiga, xirfad waxbarasho iyo bulsho weynta iyada oo si joogta ah u hormarinaysa koritaanka iyo guulaha ardayga,” ayay guddigu ku sheegtay website-keeda.

Macallimiintu waa in ay sidoo kale ka qayb galaan kulamada TWP ee dhacaya Juun 15 si ay u helaan ruqsadda Hoggaamiyaha Macallinka ah, iyada oo macallimiinta dhammeysta dhammaan kulamada la siin doono labo kabood oo khaas ah ee nooca loo yaqaan 'Air Jordan Wings'. Deeqo waxbarasho oo lagu bixinayo lacagta $108-ee-kulanka kasta ayaa la helayaa.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo isdiiwaangelinta, booqo website-ka Waxbarida Ujeedada leh.